

Tallaalada fayraska neef mareenka hadda waa la heli karaa

Oktoobar 07 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Laga bilaabo maanta, reer Alberta waxay awoodi doonaan inay ballansadaan tallaalada sannadlaha ah ee ka dhanka ah fayrasyada neef mareenka xilliga dayrta.

Dadka reer Alberta ee u qalma hadda waxay awoodi karaan inay ballansadaan ballamaha tallaalkooda iyada oo loo marayo Nidaamka Ballansashada Tallalka Alberta, iyagoo wacaya Caafimaadka ee (Health Link) ee lambarka 811 si ay u helaan ballamaha farmasiga ama rugaha caafimaadka AHS, ama si toos ah ula xiriiraya farmasiga ku dhow. Reer Alberta waxaa lagu dhiirigelinaya inay la hadlaan bixiyaha daryeelkooda aasaasiga ah si ay u helaan talo ku saabsan tallaalada iyo xulashooyinka ugu fiican shakhsiyadka iyo qoysaska.

Ballamaha tallaalada COVID-19 iyo hargabka waxaa la ballansan karaa laga bilaabo maanta si loo buuxiyo meelaha la heli karo laga bilaabo Oktoobar 15 oo loo heli karo guud ahaan dadweynaha. Ballamaha tallalka Fayraska Syncytial-ka Neefsashada (RSV) hadda waa la ballansan karaa laga bilaabo Oktoobar 21.

“Maadaama dayrtu soo dhowdahay, waa muhiim in la qorsheeyo ka hortagga fayrasyada neef-mareenka ee wareega. Waxaan si xoog leh ugu dhiirigelinaya qof kasta inuu la tashado farmasiga, dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ee deegaanka si uu u gaaro go’amo xog-ogaal ah oo ku saabsan caafimaadkooda, una hubiyo inay si wanaagsan ugu diyaar garoobaan xilliga dayrta.”

Adriana LaGrange Wasiirkha Caafimaadka

“Ku darista lakab dheeri ah oo ka hortag ah xilligan dayrta waa habka ugu fiican ee looga hortagi karo cudurrada caadiyan soo baxa inta lagu jiro bilaha dayrta iyo jiilaalka. Tallaalada fayraska neef-mareenka ee la siin doono xilligan dayrta ayaa si gaar ah loogu talagalay inay si xoog leh uga difaacaan noocyada fayrasyada la filayo inay wareegaan xilligan.”

Dr. Mark Joffe Madaxa caafimaadka guud

Cusub sannadkan, marka lagu daro tallaalada hargabka iyo COVID-19, dadka ku nool guryaha daryeelka joogtada ah iyo goobaha taageerada waayeelka ee da'doodu tahay 60 sano iyo ka

weyn waxay heli doonaan tallaalka dadweynaha ee lacag la'aanta ah ee Abrysvo si ay isaga difaacaan RSV iyada oo loo marayo Barnaamijka Wacyigelinta Alberta.

Waayeelka ku nool bulshada ee da'doodu tahay 75 sano iyo ka weyn sidoo kale waxay heli doonaan xaddi kooban oo tallaalka Abrysvo ee ay maalgeliso gobolka. Kuwa aan u qalmin barnaamijka tallaalka dadweynaha ee gobolka, tallaalada waa la iibsan karaa.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Si aad u hesho maclummaad dheeri ah oo ku saabsan fayrasyada neef-mareenka, booqo www.alberta.ca/respiratory-illness.
- Tallaalada COVID-19 iyo hargabka waxaa la siin karaa shakhsii isla maalintaas.
- Tallaalka RSV waa in la siiyo laba toddobaad ka hor ama laba toddobaad kadib tallaalka COVID-19 iyo/ama tallaalka hargabka.

Xogta la xiriirta

- Nidaamka ballansashada tallaalka Alberta ([Alberta vaccine booking system](https://www.alberta.ca/vaccine-booking-system.aspx))

Weydiimaha warbaahinta

Jessi Rampton

780-427-2137 Xog
Xoghayaha saxaafadda, Caafimaadka